

Mihnadda- iyo hagida waddada waxbarashada iyo taageero-dhaqaaleedka xilliga tababarka

Kaydka amniga TSL wuxuu ka caawini karaa horumarinta karti-xirfadeedkaaga, wuxuuna kaalin ka geysan doonaa xoojinta heerka aad mustaqbilka ku yeelan doonto suuqa shaqada. Taageerada waxay ka kooban tahay mihnadda- iyo hagida waddada waxbarashada iyo fursadaha lagu helo taageero-dhaqaaleed, waa haddii aad doonayso inaad ka qayb gasho tababar.

Adigoo kaashanayo taageerada waxaad kororsan kartaa aqoonta doorka imminka, ballaarisoo karti-xirfadeedkaaga ama qaar ama gebi ahaan ba xirfadda iska beddesho. Waxaad sidaas ku samayn kartaa adigoo soo jiidasho leh, oona suuqa shaqada ku tartami karto.

Taageerada waxay kaloo qayb ka tahay heshiis wadareedka ka hirgalay goobta shaqada mana bixinaysid wax kharash ah.

Sidatan ayaa loogu dhaqaaqa:

1. Codsashada

Marka hore booqo barta internetka [tsl.se](https://www.tsl.se), kaddib waxaad halkaas ka aqrisan kartaa warbixin dheeraad oo ku saabsan taageerada iyo sida loo codsado iyo sida hagd loo helo.

2. Xiriir

Codsashada kaddib waan kula soo xiriiri doonaa, kaddib waxaan kula yeelan doonaa wadhadalkii hagida ee ugu horreeyay, waxaana ka wadhadli doonaa xaaladaada iyo fursadahaaga.

3. Hagida

Haddii aad doonayso oona u baahan tahay mihnadda- iyo hagida waddada waxbarashada oo qoto dheer iyadoo dhawr jeer aad noola kulanto.

4. Koorsooyin muddo gaaban iyo kuwa muddo dheer

- Haddii aad ka qaybgasho tababar aan shan maalmood ka badnayn, waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-dhaqaaleedka ee u bixiyo Kaydka amniga TSL. Haddii lagu oggolaado taageerada, waxaa lacagta lagu siin doonaa bisha ku xigta bisha aad tababarka dhammaystay.
- Haddii aad doonayso inaad ka qaybgasho tababar shan maalmood ama ka badan, waxaad xaq ugu lahaan kartaa Taageero-dhaqaaleedka dib u habaynta waxbarashada ee Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] bixiso iyo taageero-dhaqaaleed dheeraadka Kaydka amniga TSL. Qoraalka codsashada ee loo qoro ayaa Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] ayaan ka caawini karna. Haddii taageero-dhaqaaleedka lagu oggolaado waxaa lacagaha lagu soo diri doonaa markii tababarka u bilaawdo.

Shuruudaha lagu helo mihnadda- iyo hagida waddada waxbarashada:

- Haddii shirkad aad u shaqayso oo u ku khuseeyo heshiis-wadareedka ay wada galeen Ururrada Ganacsateyaasha dalka Iswiidan iyo Ururrada Shaqaalaha dalka Iswiidan LO.
- Haddii 24 bilood ee ugu dambeeyeen aad ugu yaraan 12 bilood soo shaqaysatay.
- Haddii weli aadan 65 sano buuxsan.

Shuruudaha gundhig u ah qaadashada taageero-dhaqaaleedka:

- Haddii 24 bilood ee ugu dambeeyeen aad ugu yaraan 12 bilood soo shaqaysatay.
- Haddii 14 sano ee ugu dambeeyeen aad ugu yaraan 8 sanadood soo shaqaysatay.
- Haddii da'daada ay u dhaxayso 27 ilaa 62 sano.

Shuruudo kale ayaa jiraan, kuwaasoo lagu wargelin doono haddii aad hay'adda la xiriirto. Taageero-dhaqaaleedka waa kabidda ilaa boqolkiiba 80 ee daqliga caadiga ah xilliga aad wax baranayso. Taageero-dhaqaaleedka waxaad ugu badnaan qaadan kartaa 44 toddobaad (ama 10 toddobaad sannadka aad 60 sano buuxsanayo) waa haddii wakhti buuxo aad wax baranayso, oona aadan nus wakhti wax baranayn.

Warbixin dheeraad iyo caawinaad shaqsiyeed

Warbixin dheeraad ku saabsan taageerada waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka TSL.se. Xagga sare ee bogga waxaad ka beddeli kartaa luqadda.

Soo-dhowoow, caawinaad shaqsiyeed darteed noola soo xiriir:

- Khadka taleefanka: 010-480 91 20
- E-mail: info@tsl.se